**HABKA LACAG BIXINTA TALAABADA KOOWAAD EE MISSOURI**

## HABKA LACAG BIXINTA

*(Qodobka 34 Qaanuunka Dowlada dhexe Qeybta Xeerarka 303.520 iyo 303. 521; Qorsheynta Gobolka Missouri*
*Qeybta XVIII; iyo Dastuurka Dib loo hubiyey ee Missouri 160.920 and 376.1218)*

Marka lagu daro deeqda gobolka iyo dowlada dhexe, mashruuca Talaabaa Koowaad wuxuxuu ka qeybqaatayaasha uga faa'iideynayaa qiimaha, caymiska gaarka loo leeyahay iyo caymiska dadweynaha)MO HealthNet/Medicaid), tani waxay abuureysaa nidaam lacag lacagneed oo lagu bixiyo mashruuca. Wasaarada Waxbarashada ee Dugsiyada Hoose iyo Sare (DESE) iyo gobolku waxay heshiis ku wada galeen sidii loo abuuri lahaa dhaqaale lagu bixiyo adeegyada Talaabada koowaad.

*Habka Lacag bixinta ee Nidaamka Missouri* wuxuu waalidka u ogolaanayaa inta aaney bixin ogolaanshaha iney isticmaali karaan caymiska caafimaadka ee gaarka loo leeyahay iyo/ama caymiska caafimaadka ee dadweynaha si ay ugu bixiyaan adeegyada Talaabada Koowaad ka hor inta aan la helin ogolaanshaha in la helo adeegyada ay bixiso Talaabada Koowaad. Sharcigani wuxuu sharxayaa qiimaha ajuurada la bixinayo bishii iyo sida waalidku ugu loolami karaan canshuur bixinta ajuurada iyo/ama go'aanka DESE ay ka yeelan karto waalidka awoodi kara iney bixiyaan ajuurada. Nidaamkani waxa kale oo uu sharaxayaa qiimaha ay ku kaceyso hadii uu waalidku isticmaalo caymiska caafimaadka ee gaarka loo leeyahay ama midka dadweynaha si lowgu bixiyo adeegyada Talaabada Koowaad.

## QOYSKA KA QEYBQAADANAYA QIIMAHA KU KACEYSO (FCP)

DESE waxay fulineysaa nidaam loo aasaasey qiimaha uu qoysku ku heli karo adeegyada Talaabada Koowaad sida uu fulinaayo sharciga gobolku. Ilmo kasta oo u qalma ka qeybqaadashada mashruuca Talaabada Koowaad waa la hubiyey si go'aan looga gaadho qiimaha ajuurada ka qeybqaadashada.

### Sharaxaadyo

Waxyaabaha soo socdaa waxay qoysaska ka cawinayaan iney fahmaan sida loo ururiyo warbixinta lagu go'aamiyey FCP qiimaheeda iyo sida ajuurada loo xisaabiyey:

Dagliga guud ee la cayimey
Dakhliga guud ee la cayimey micneheedu waxa weeyaan dakhliga la cayimey marka loo eego foomka canshuur celinta ee sanadkii hore ay sameysey dowlada dhexe.

Qiimaha qoyska ka qeybqaadanaya/ajuurada qoyska
Qiimaha qoyska ka qeybqaadanaya/ajuurada qoyska macneheedu waxa weeyi inta ugu badan ee waajib ku ah inuu qoysku bixiyo bishiiba taasi oo ku saleysan awooda qoysku ku bixin karo, iyada oo loo eegaayo guud ahaan dakhliga qoyska ee sanadkii hore foomka cashuur calinta dowlada dhexe. Ajuuradu waxay xidhan tahay qoyska inta uu dhan yahay, looma eegayo ilmo kasta.

Kharashka qoyska
Kharashka qoysku macneheedu waxa weeyi wixii ku baxey qoyska noloshiisa, marka lagu daro wiixii kaga baxay daawooyinka, taasi oo laga yaabo in loo arko mid dhaqaalaha qoyska cidhiidhi galineysa hadii si sax ah loo xisaabinin ajuurada bishii.

Guud ahaan qoyska/ Inta guri ku wada nool
Guud ahaan qoyska/ inta guri ku wada nool macneheedu waxa weeyi koox dad ah oo meel

wada degan oo warbixintooda loo isticmaaley in go'aan looga gaadhointa uu qoysku le'eg yahay iyo dhaqaalaha soo gala.Wey ku jiri karaan laakiin kuma koobna waalidka caruurta dhaley waalidka korsadey, waalidka ku yimid guur, iyo caruurta ( la dhaley ama la korsadey). Ujeedad qoyska tiradiisa loo eegayaa waa sidii go'aan loo gaadhi lahaa, qoyska inta ka tirsan ee aan wali isku filnaansho gaadhin waa iney waafaqaan Qaanuunka dakhliga Gudaha ee dowlada dhexe.

Masuulka dadka guriga ku nool/qofka masuulka ah
Masuulka dadka guriga ku nool/qofka masuulka ah macneheedu waxa weeyi qofka isagu ka masuul ah inuu bixiyo ajuurada ka qeybqaadashada ee bishiiba loo xisaabiyey.

Xaqiijinta dhaqliga
Xaqiijinta dakhliga macneheedu waxa weeyi muddada ay socoto muraajaceynta sidii loo diiwaan galin lahaa qoyska dhakhliga soo gala iyo kharashka la ogol yahay inuu ku baxo noloshooda taasi oo dhacda mudada ay socoto qadashadu, murajacada sanadlaha ah, ama waqtiyada kale ee qoysku codsado, Habka lagu Galo (SPOE), or DESE.

Guud ahaan dakhliga sanadkii la xoogsadey
Guud ahaan dakhliga sanadkii la xoogadey macneheedu waxa weeyi iskugeynta dakhliga ka soo gala shaqo ka hor inta aan waxbna laga jarin iyo canshuurta dowladu ka jartaba. Tusaale, marka lagu daro mushaharka, yoomiyaah, gunada, dilaalka, bakhshiishka iyo wixii soo gala kharash ee la waajib yeeley in la wargaliyo sidii canshuurta dowada dhexe.

Guud ahaan dakhliga sanadkii aan la xoogsan
Guud ahaan dakhliga sanadkii aan la xoogsan macneheedu waxa weeyi isku geynta dhakhliga ka soo baxa maalgashi iyo ilo kale oo aan la xiriirin shaqo. Tusaale, marka lagu daro dulsaarka lacag ka soo baxa, guno, saami qeybsi, lacag dhaxal sanadkiiba aad heshid, ijaar, howlgabka, lacagta la siiyo dadka laxaadka daran/faa'iidada la siiyo dadka dhib soo gaadhey, xaqa la siiyo qof shaqada dhib ku gaadhey,lacagta dadka aan shaqeynin la siiyo,faaiidada howlgabka, iyo dhakhli kasta oo lagu waajib yeeley in la wargaliyo cashuurta dakhliga dowlada dhexe.

Canshuur celinta dowlada dhexe waa hab la door bidey oo lagu ururiyo guud ahaan dakhliga sargo'an iyo guud ahaan qoyska/inta guri ku wada nool.

**Jadwalka ajuurada FCP**
FCP ajuurada ay qaadaa waxay ku saleysan tahay isbedelka lacagta qoysku sameeyo taasi oo loo eegayo guud ahaan inta qoyska soo gasha iyo inta qof ee uu ka kooban yahay. Go'aanka laga gaadhayo in waalidku awoodi karo ama aanuu awoodi karin waxaa loo eegayaa ugu horeyn Adeega Sida gaarka ah lowgu Qorsheeyey Qoyska (IFSP), sanadlaha IFSP iyo waqtiga kale ee uu qoysku codsadey. Qoysaska laga cawiyey ajuurada, ajuurada inta ugu yari waa $5.00 inta ugu badanina waa $100.00 bishiiba. Cabirkani waxaa la sameeyey iyada oo la tixraacayo 200% ee cabirka khadra danyarnimada ee dowladu cayintey oo la sameeyey sanadkii 2005.

Qaabkani lacagaha loo cabiro waa la cusbooneysaa sanad walba marka uu dhaco isbedel ah xaga qaabka ay dowlada dhexe u cabirto danyarnimada. Isbedelka ku yimaada xaga xisaabta laga qaadey qoyska taasi oo bilaabmi doonta bisha soo socota marka la sameeyo isbedelka. Qaabka lacag cabirka waxaa laga eegi karaa shaashadani: http://www.dese.mo.gov/divspeced/FirstSteps/FCPmainpg.htm.

**FCP Ajuurada la Sargooyey iyo Dhaqaale darada**

Sargoynta bishiiba ee FCP laga yaabaa iney korodho ama yaraato mar walba, marka lagu daro mudada la sameeyey qiimeynta ugu horeysa, iyada oo loo eegayo waxyaabaha soo socda awgood:

1) Isbedel ku yimaada guud ahaan qoyska/ qiyaastii inta guri ku wada nool;
2) Isbedel ku yimaada dhaqliga sanadkii oo dham oo ka badan boqolkiiba toban; iyo,
3) Dhaqaale daro aan lagu talogalin oo qoyska ku timaada taasi oo saameyn dhaqaale ku keenta qoyska (marka lagu daro balse aanlagu koobin oo kaliya; guriga oo lagaa qaato, shaqo la'aan, kharash daawo lagu bixiyey oon ku jirin qorshaha,iyo waxyaabo kale oo macquul ah oo uu go'aankeeda gaadhey Agaasimaha SPOE).

Waalidku waxay haystaan mudo dhan 15 maalmood gudahood iney ku soo wargaliyaan Iskuduwaha Adeega. Hadii waalidku ku guuldareystaan wargalinta mudada ku haboon ee la qabtey isla markaana ajuurada qoyska la xisaabiyey, ka dhimida cusub ee ajuurada la dhaqan galinmaayo isla marka uu isbedelku dhacey.

**Qiimeynta FCP**

Ilmo kasta oo u qalma iyo qoyska ka qeybqaadanaya Talaabada Koowaad waa la qiimeeyey ajuurada (FCP) waana la xaqiijiyey iney awoodi karaan iyo in aaney awoodi karinba.

*Qoyska oo awoodi kara inuu bixiyo* waxay tilmaameysa inuu qoysku leeyahay awooda dhaqaale taasi oo u suurtogalin karta iney bixin karaan adeegyada ay bixiso Talaabada Koowaad. Go'ankani waxaa lagu gaadhi karaa awooda dhaqaale ee qoyska marka loo eego habka ay dowladu u cabirto dhaqaalaha ee ajuurada loo bixiyo. Waxaa lagu meeleyn karaa qiimaha ugu hooseeya ee qoysku bixin karo (ka weyn $0) sida uu aasaasey sharciga gobolku ama DESE taasi oo tilmaameysa awooda la bixin karo.

Marka loo eego sharciga gobolka, hadii qosku uu go'aansado inuu bixin karo, ajuurada waxaa lagu kordhin doonaa ($100), laakiin maaha qiimo ka badan inta caadiga ah ee lagu bixiyo adeegyada Talaabada Koowaad, marka loo eego xaaladaha soo socda:

1) Waalidka oo diidey iney siiyaan SPOE warbixin dhaqaalahooda ku saabsan si loo xisaabiyo ajuurada.
2) Waalidka oo bixiyey warbixin been ah ama qaldan.

*Qoyska oon awoodi karin inuu bixiyo* waxay tilmaameysaa in go'aanku noqdo inaan qosku dhaqaale uu ku bixiyo adeegyada ay bixiyo Talaabada Koowaad aanuu haysanin. Waxaa lagu meeleyn karaa qaabka ugu hooseeya ee ajuurada loo bixinayo $0 taasi oo sheegeysa inaaney jirin awood lagu bixiyaa.

Qoyska la go'aamiyey in aaney lahayn awood ay ku bixiyaan waa kuwa haysta Caafimaadka dowladu bixiso (Medicaid) (gobol kastaba oo ay ka haystaanba), Dhaqaalaha lagu kabo Dadka aan shaqeyn karin (SSI), Kaadhka caydha ee Raashinka lagu gato (Food Stamps), ama cunuga oo dowladu qof koriya u dhiibatey. Intaa waxa raaca, ka qeybgaka Talaabada Koowaad dhimi meyso daaweynta ama kaalmooyinka kale ee gobolku bixiyo kuwaasi oo hoos yimaada Qodobka V ama XIX ee Social Security Act

Hadii go'aan laga gaadho inaan qoysku bixin karin, diidmada ogolaanshaha waalidka ee isticmaalka caymiska gaarka loo leeyahay lagama yaabo iney dib u dhigto ama loo diido nooc kasta oo ka mid ah adegyada. Qoyska la go'aamiyey inaaney bixin karin waxay bilaash ku heli doonaan adeegyada Talaabada Koowaad oo dhan.

*Lacagta oon la bixin* waxay keeni in la gaadho go'aan ah in qoysku awoodi karo inuu iska bixiyo, laakiin aaney iska bixinin ajuuradii sanadlaha ahayd ee FCP. DESE waxay qaadaa talaabo ay ku

ururineyso lacagaha aan la bixinin, kuwaasi oon ku koobneyn kaliya, in laga xayiro adeegyada Talaabada Koowaad marka laga reebo kuwa lacag la'aanta ah, Qoyska waxaa lagu wargalin doonaa warqad boostada lowgu diro marka lacag bixinta bisha ay:

1) 30 maalmood dhaafey xiligii bixinta;
2) 60 maalmood dhaafey xiligii bixinta; iyo,
3) 75 maalmood dhafey xiligii bixinta.

Maalinta 75naad ka dib ajuurada la xisaabiyey ee bishii een la bixin, qofka qoyska ka masuulka ahi wuxuu heli doonaa warqad lagu war galinayo oo sheegeya in adeegyada Talaabada Koowaad ( marka laga reebo kuwa lagu helo lacag la'aanta) kaga joojin doona maaalinta 90naad hadii aan la bixinin lacagta. DESE waxaa iyadana ku waajib ah iney wargaliso SPOE sida ugu haboon marka qoysku aanuu bixinin lacagta. Waxaa warbixinta la ururiyey ku jiri doonta in amar lagu bixiyey in adeegyada la xayiro sababta oo ah waxaa la bixin waayey ajuuradii waajibka ahayd. Lagama yaabo inuu qoysku helo wax adeeg ah ilaa qodobada dib u soo celinta la maro.

**Hanaanka Dib u soo Celinta**

Adeegyada la xayirey ee ay sabab u tahay ajuurada oo la bixin waayey waxaa laga yaabaa in dib loo bilaabo marka la bixiyo lacagtii hore loo lahaa oo dhan. Hadii mudo ka yar sadex bilood ay dhaaftey ilaa waqtigii la xayirey adeegyada, waa waajib in Iskuduwaha Adeegyadu dib u qiimeeyo qiimaha FCP ka hor inta aan dib loo bilaabin adeegyada. Si kastaba ha ahaatee, hadii in ka badan sadex bilood ay dhaafto mudada la xayirey adeegyada, waxaa waajib ah in iskuwaha Adeegyadu dib u qiimeeyo qiimaha FCP iyo IFSP hore u jirey labadaba ka hor inta aan dib loo bilaabin adeegyada. Qoyska loo balan qaadi mayo iney helaan qofkii hore ay ula xiriiri jireen ka hor intii aan addeegyada laga xayirin.

**FCP Qoraalkeeda**

Xafiiska Dhexe ee Maamulka lacagta ayaa qoyska u diri doona xaashida lacagta lagu bixiyo oo ka ururin doona lacagta ajuurada. Lacagta ajuurada ee lagu bixinayo adeegyada qoysku uu ka heley Talaabada Koowaad waxa la iska doonayaa xili kasta oo bisha ah taasi oo ah waqtiga qosku uu heley adeega. Qoysaska la weydiin maayo iney bixiyaan wax ka badan adeega ay heleen (Marka la isku wada xisaabiyey wixii qadar laga heley ilaha kale ee lagu bixinayo adeegaasi). Qoysaska haysta caymiska gaarka loo leeyahay ama midka dowladu bixiso laga qaadi maayo in ka badan qoysaska aan haysanin caymiska dowlada ama midka gaarka loo leeyahay.

**Ka doodista Ajuurada FCP**

Waalidka raba iney ka doodaan canshuurta ajuurada, ama go'aanka laga gaadhey awoodooda dhaqaale, waxay sameyn karaan sidan soo socota:

1) Waxay ka qeybqaadan karaan dhexdhexaadin.
2) Codsan karaan dhageysi maxkabadeed.
3) Waxay xereyn karaan dacwo heer gobol.
4) Isticmaalaan hab kasta oo ay kaga heli karaan gobolka inuu dedejiyo isii loo calin lahaa cabashadooda dhaqaale, taasi oon dib u dhigi kareynin ama diidi karin xuquuqda waalidka.

**Adeegyada Bilaashka ah**

Adeegyada soo socda bilaash ayaa lagu siiyaa dhamaanba caruurta iyo qoysaska loo soo gudbiyey Talaabada Koowaad:

1) Waxqabadyo lowgu talogaley Ilmaha;
2) Baadhis iyo qiimeyn;
3) Iskuduwida adeegyada; iyo,
4) Maamulka iyo iskuduwida waxqabadyada ( marka lagu daro horumarka, dib u eegida iyo qiimeynta ay sameyso IFSPs iyo xuquuq siinta waalidka)

Dhamaan adeegyada Talaabooyinka Koowaad marka laga reebo mida bilaashka ah ajuurada waa is

bedeli kartaa.

**CAYMISKA GAARKA LOO LEEYAHAY**

DESE waxay hirgalisey nidaamka lacag bixinta taasi oo ay aasaastey in caymiska gaar loo leeyahay uu ka qeybqaadan karo qiimaha lagu bixinayao adeegyada Talaabada Koowaad. Sida sharciga gobolku uu dhigayo, kuwa leh caymisyada gaarka loo leeyahay ee ka howlgala Misouri waxaa la siin lacagta iyada oo loo eegayo sida loo qoondeeyey sanadkii. Caymislayaashu waxay ka dooran karaan mid ka mid ah labada qodob ee loo qoondeeyey sanadkii.

**Doorasho 1: Hal mar/Lacag bixinta Bogolkiiba**

Caymiska gaarka ahi wuxuu bixinayaa lacagta Talaabada Kowaad bisha Janaayo 31 keeda ee sanadka kharashka cadadkiisu yahay hal-iyo badh ee boqolkiiba hal sida lagu cayimey qoraalka qeybta la bixiyo ee qorshaha faa'iidada caafimaadka sida lagu wargaliyey Wasaarada Caymiska, Hay'adaha lacagaha maamula iyo Xirfadleyda Diiwangalinta ee caymiska caafimaadka laga gato ee dhawaan buuxiyey qoraalka xisaabta sanadlaha, ama shan boqol oo kun oo doolar, midkii yar. Cunug kaliya ama warbixinta adeega oon lagu wargalinin kuwa caymiska caafimaadka laga gato inuu hoos imanayo ka xulashada halmar/boqolkiiba iyo waalidka oo arintani la wargalieyey isla waqtiga ogolaanshaha laga rabo waalidka.

**Doorasho 2: Sheegashada Tooska ah**

Kuwa laga gato caymiska ayaa bixinaya qiimaha loo adeegsado MOHealthNetMedicaid ee Talaabada Koowaad oo kasta taasi oo adeega lowgu bixinayo sida, hab daaweyn ah oo shaqo lowgu sameeyo dad jiran, hadalka/dabiibka habka loo hadlo, dabiibka jidhka, iyo Qalabka caawimada loo adeegsado. ilmo kasta iyo warbixinta adeega waxaa loo gudbini kuwa laga gato caymiska taasi oo hoos imaneysa mida sida tooska ah loo xushey waalidkana waa lala socodsiin waqtiga ogolaanshaha waalidka.

**Isticmaalka Caymiska Gaarka loo leeyahay**

Waxaa laga yaabaa in qoysku isku soo jiido dhib kaga timaada isticmaalka caymiska gaarka loo leeyahay. Waalidka waa la wargaliyey isla waqtiga bixinta ogolaanshaha wixii dhib macquul ah ee kaga iman karta isticmaalka caymiska gaarka loo leeyahay:

1) Caymiska caafimaadka ee gaarka loo leeyahay oo lagu bixiyo adeegyada Talaabada Koowaad waxa laga yaabaa in laguu xisaabiyo ama ay sababto in laguu diido faa'iidooyinka sababta oo ah sanadkiiba ama noloshaada oo dhan caafimaadkii lagaa bixin lahaa, ka ilmaha lowgu talogaley, waalidiinta, ama dad kale oo qoyska ka tirsan.
2) Isticmaalka caymiska caafimaadka ee gaarka loo leeyahay ee loo adeegsado bixinta adeegyada Talaabada Koowaad waxaa laga yaabaa iney kugu yeelato saameyn aan wanaagsaneyn oo ka galaafato caymiska caafimaad ee ilmaha uu heli lahaa, waalidka, ama dadka qoyska ka tirsan.
3) Isticmaalka caymiska caafimaadka ee gaarka loo leeyahay ee lagu bixiyo adeegyada Talaabada koowaad waxaa laga yabaa in ay sal u tahay kordhinta lacagta lagu bixiyo caymiska caafimaadka ee lagu kordhiyey ilmaha, waalidka ama dadka qoyska ka tirsan.

Hadiiba ay dhacdo in Caymiska caafimaadka ee la heli lahaa la waayo iyada oo ay sababtey ka qeybqaadashada Talaabada Koowaa, qoysku waa iney la soo xiriiraan Iskuduwaha Adeega.

**Lacagta Caymiska lagu bixiyo/ Wax iska bixin/Lacagta loo jaro caymiska**

Waalidka ayaa ka musuul ah iney bixiyaan lacagta lowgu talo galey iney ku gataan caymiska caafimaadka ee gaarka loo leeyahay. Talaabada Koowaad waxay bixisaa adeegyo ee kuma qasabto qofna iney wax ka bixiyaan marka la isticmaalo in lagu bixiyo caymiska caafimaadka ee gaarka loo leeyahay adeegyada Talaabada Koowaad. Hadiiba ay dhacdo in qoyska laga qaadey

lacag noocaasi oo kale ah waa iney la soo xiriiraan Iskuduwaha Adeega.

**Ogolaanshaha Waalidka ee Caymiska Gaarka loo Leeyahay**

Waa iney SPOE heshaa ogolaanshaha waalidka ka hor intaTalabada Koowaad raadin iney isticmaalka caymiska gaarka loo leeyahay ee waalidka si lowgu bixiyo adeegyada Talabada Koowaad ee ay ugu horeyntii bixiso marka loo eego IFSP. SPOE waa iney heshaa ogolaanshaha waalidka ka hor inta aan Talaabada Koowaad raadin iney isticmaalaan caymiska gaarka loo leeyahay ee waalidka si ay ugu bixiyaan kordhinta mudada, inta lagu gudo jiro, marmar, adeegyo tiro badan oo laga helo Talaabada Koowaad iyadoo la tixraacayo IFCP.

Ogolaansha waalidka laga heley ee ku saabsan isticmaalka caymiska gaarka loo leeyahay macneheedu waa warbixinta qofka aqoonsigiisa oo la bixiyey si lowgu diro warqada lacag bixinta caymiska gaarka loo leeyahay ee loo isticmaaley adeegyada Talaabada Koowaad. Hadii qoysku uu go'aansado iney aaneu bixin karin, diidmada waalidka ee ah in la isticmaalo caymiska gaarka loo leeyahay lagama yaabo iney dib u dhigto ama loo diido adeegyada.

Hadii waalidku aaney ogolanin isticmaalka caymiska gaarka loo leeyahay, adeegyada bilaashka ah iyo kuwa kale ee ay bixiso Talaabada Koowaad ee ku jira liistada ilmaha ee IFSP kuwaasi oo waalidku ogolaadey waa waajib in ilmaha loo sii wado.

Hadii qoysku haysto caymiska gaarka loo leeyahay, taasi oo ay waajib tahay in caymiska gaarka loo leeyahay uu bixiyo ka hor inta aanu bixin caymiska dadweynuhu, laga yaabaa in qoysku isku soo jiido dhib kaga timaada sida lagu qeexay *Isticmaalka Caymiska Gaarka loo leeyahay-Doorasho:* qeybta Sheegashada Tooska ah.

**CAYMISKA DADWEYMAHA**

DESE waxay hirgalisey nidaamka lacag bixinta taasi oo ay aasaastey in caymiska dadweynaha uu ka qeybqaadan karo qiimaha lagu bixinayo adeegyada Talaabada Koowaad. Caymiska dadweynuhu wuxuu u gudbiyaa kharashla loo qoondeeyey MO HealthNet/Medicaid.

DESE waxay wargalisaa qoysaska caymiska dadweynaha ee la heli karo, laakiin kuma waajib yeesho waalidka iney saxeexaan oo qaataan caymiska dadweynaha si ay u helaan adeegyada Talabada Koowaad.

**Isticmaalka Caymiska Dadweynaha**

Marka loo eego qodobada heshiiska dhex marey hay'adaha DESE iyo Qeybta MO HealthNet, adeegyada Talaabada Koowaad ee ay sheegato MO HealthNet/Medicaid ku noqon meyso caqabad ilmaha ama waalidka caymiska dadweynaha ee ay heli karaan sababah hoos ku dhigan awgood:

1) Hoos u dhac ku yimaada caafimaadka oo qofka noloshiisa oo dhan laga bixinayey ama faa'iido kale oo hubaal ahayd inuu ilmahu helo ama waalidka ka midka ahaa qorshaha.
2) Iney timaado in waalidku uu bixiyo adeegyo ilmaha ay ka bixin lahayd qorshaha caymiska dadweynaha.
3) Iney timaado in la kordhiyo lacagta lagu bixiyo caymiska ama laga gooyo lmaha caymiska dadweynaha ama waalidkiisa.
4) In ilmaha ama waalidkiisa ay waayaan u qalmitaanka adeegyada bulshada ama kuwa guriga ee ay xaqa u lahaaeen iney helaan sababtoo ah kharashyo la xiriira caafimaadka oo aad u batey.

**Ogeysiiska Waalidiinta**

SPOE waa iney heshaa ogolaanshaha waalidka ka hor inta aan loo gudbin HO HeathNet/Medicaid warbixinta ka kooban qofka aqoonsigiisa si loo bixiyo lacagta adeegyada Talaabada Koowaad.

Hadii waalidku aanuu bixin ogolaanshaha isticmaalka caymiska dadweynaha, adeegyada bilaashka ah iyo kuwa kale ee ay bixiso Talaabada Koowaad ee ku jira liistada ilmaha ee IFSP kuwaasi oo waalidku ogolaadey waa waajib in ilmaha loo sii wado.

Waalidku waa ay ka noqon karaan go'aankooda ogolaanshaha caymiska dadweynaha mar kasta oo ay rabaan.

Waalidka ayaa ka masuul ah iney iska bixiyaan lacagta laga bixiyo caymiska dadweynaha ee waalidku isticmaalayo, hadii loo baahdo. Qoysaska haysta caymiska dadweynaha, Talaabada Koowaad waxay bixisaa adeegyo ee kuma qasabto qofna iney wax ka bixiyaan qadarka la bixiyo ee caymiska caafimaadka dadweynaha ama lacagta qofka laga gooyo.

**Ogolaanshah Waalidka ee Caymiska Dadweynaha**

SPOE waa iney hesho ogolaanshaha ka hor inta aaney u gudbinin MO HealthNet/Medicaid warbixinta ka kooban qofka aqoonsigiisa si ay ilmaha/waalika u helaan MO HealthNet ama ay u isticmaalaan caymiska dadweynaha si ay ugu bixiyaan adeegyada Talaabada Koowaad sida ay dhigeyso IFSP. Ogolaansha waalidka ee caafimaadka dadweynaha waa waajib in la helo hadii ay dhacdo xadgudub lagu sameeyo caymiska dadweynaha sida lagu qeexay *Isticmaalka Caymiska Dadweynaha qeybta kore.*

**Qoysaska haysta Caymiska Gaarka loo Leeyahay iyo Caymiska Dadweynaha**

Hadii qoysku haysto caymiska gaarka loo leeyahay iyo caymiska dawladu bixiso labadaba, taasi oo caymiska gaarka loo leeyahay ay waajib tahay in hore loo bixiyo inta aan la bixin caymiska dadweynaha, laga yaabaa in qoysku isku soo jiido dhib kaga timaada sida lagu qeexay *Isticmaalka Caymiska Gaarka loo Leeyahay – Doorashoo 2: qeybta Sheegashada Tooska ah.* Qoyska waa ku waajib ogolaanshaha caymiska gaarka loo leeyahay iyo caymiska dadweynaha labadaba.